



SYRACUSE CITY SCHOOL DISTRICT

Jaime Alicea, Superintendent of Schools

Xafiiska Maamulaha Guud

4 Maayo 2020

Qoysaska Qaaliga ah ee SCSD:

Waxaan doonayay inaan markale idiin ka mahad celiyo dulqaadkiina, fahankiina iyo taageeradiina anagoo sii wadna inaan wada shaqayno inta lagu jiro waqtiyadaan adag. Waan ogahay in waxbarashada oonleenka ah aysan ahayn wax fudud laakiin macalimiinteen, maamulayaasha iyo shaqaalaha taageerada ayaa aad uga shaqaynaaya xaqiijinta in adigga iyo carruurtaadu aad heshaan agabka iyo taageerada si aad guul u gaartaan.

Waxaa laguusoo diray kaarka warbixinta buundada fatrada sadexaad ee cunugaga oo boostada la guugusoo dirayo boostada. Haddii cunugaagu helay buundo kala dhiman oo laga siiyay buundada maado inta lagu jiro fatrada buundo bixinta ee sadexaad, wuxuu haystaa ilaa Maayo 29, 2020 inuu kusoo gudbiyo shaqo kasta oo loogu baahan yahay kor u qaadista buundadiisa oo hadda ah mid aan dhamayn loogana dhigo mid baasid ah. Hadday jiraan xaalado kaa hortaagan cunugaaga inuu dhammeeyo shaqadiisa marka la gaaro Maayo 29keeda, fadlan toos ula xariir macalinkiisa kadibna dajiya qorshe mudada loogu kordhinaayo ardayga.

Habraacyada bixinta buundada fatrada afraad ee ardaydeena dugsiga hoose ee fasalada PK-5 ayaa siinaya ardayda sii wadaya dugsiga inay helaan kaararkooda warbixinta oo ay ku qoran yihiin buundooyinkooda ayadoo la adeegsanaayo nidaamka hadda shaqeyya. Waxaan ku darnay dookh ay macalimiintu xogta Ni-Not oo ku ffilan u bixinayaan, ayna la socdaan hadalka fikirka macalimiinta.

Ardayda dugsiga dhexe iyo sare ee fasalada 6-12 waxay heli doonaan buundooyinka caadiga ah ee tirsiga ah (0-100) ama I (Aan dhamaystirnayn) oo laga siinayo shaqada ay dhameeyaan inta lagu jiro fatarada afraad ee buundo bixinta. Buundada ugu danbaysa ee koorsada ayaa noqon doonto mid kamid ah sadex waxyaabood: PD (Ku baasida Buundo sare), P (Baasid) ama I (Buundo aan dhamayn). PD waxaa hela ardayda keena buundada tirsi ahaan u dhaxaysa 85-100, P waxa hela ardayda buundadoodu tahay 65-84 halka bundada I ay helaan ardayda keena 64 iyo kasi hoose. Ardayda hesha buundada PD ama P buundada koorsada kama danbaysta ah ayaa helaaya dhibcaha buundada.

Ardayda helaaya buundo aan Dhamayn ayaa la siinayaa casharada xiliga xagaaga si ay u helaan buundo buuxda. Ardayda waxaa sidoo kale la siin doonaa fursad kasta iyo taageerada suuragalka ah si ay usoo gudbiyaan shaqadooda inta lagu jiro xagaaga si ay u helaan buundo baasid ah sanad dugsiyeedka 2019-20. Dookhyada dheeraadka ah ee soo kaabista buundada iyo taageerooyin ayaa ardayda la siin doona sanad dugsiyeedka soo socda haddii loo baahdo, ilaa Janaayo 2021.

Dhammaan imxaanaadka Regents, oo ay ku jiraan imtaxaanada Agoosto ayaa la joojiyay sanad dugsiyeedka 2019-2020. Arday kasta oo qaadanaaya koorso Regents ah oo ku baasay koorsada wuxuu heli doonaa buundada Regents.

Mar kale ayaan idiin ka mahadcelinaynaa wax kasta ood u samaynaysaan taageerida ardaydiina. Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo la xariira hormarka cunugaaga ama buundooyinkiisa, fadlan la xariir macalinkiisa ama maamulaha dugsiga.

Si daacad ah,

A handwritten signature in black ink that reads "Jaime Alicea". The signature is written in a cursive, flowing style.

Jaime Alicea
Maamulaha Guud ee Dugsiyada